


Qeybta Taageerada Qoyska Qaxootiga

- › Waxaa jira 600 goob oo sanadkiiba loogu talagalay Qeybta Taageerada Qoyska Qaxootiga
- › Ma jirto kharash la isku diiwaangelinaayo ama lagu codsanaayo
- › Socdaalka New Zealand ayaa isku dubarideysa oo bixinaysa lacagta qiimeynta caafimaadka.
- › Socdaalka New Zealand ayaa isku dubarideysa oo bixinaysa lacagta kharashaadka safarka ee kiisaska la ansixiyey
- › Adeeg bixiyaha Taageerada Dejinta ayaa kaa caawin karaa inaad qorsheyneyso imaatinka qoyskaaga

HANAANKA LA CUSBOONEYSIIYEEY



Talo Joogto ah
Adeeg bixiyaha adeega dejinta iyo isku xirida qoyska la kafaalo qaaday si loo arko sida ay wax u socdaan. Qoyska la kafaala qaaday ayaa talo dheeraad ah ka raadsan karaa adeeg bixiyaha maadaamaa ay u guurayaan safarkooda degitaanka ee Aotearoa.

Hanuun
Qoyska waxay ka qeybgali karaan barnaamijka hanuuninta bulshada oo ikhtiyaarka ah.

Imaatinka Qoyska
Adeeg bixiyaha adeega dejinta ayaa booqan karaa qoyska isla markiiba marka ay yimaadaan. Tani waxaa loo baahan yahay inuu diyaariyo qoyska ama kafiilka. Adeeg bixiyaha ayaa ku xiri karaa qoyska barnaamijka dhaqan barida bulshada wuxuuna hubin doonaa in qoysku uu yaqaano sida loogu xirmo adeegyada aasaasiga ah.

Diyaarinta
Kafiilka wuxuu diyaariyaa imaanshaha qoyska. Waxay ka raadsan karaan talo iyo hagida adeeg bixiyaha adeega dejinta ee aagooda.

Duulimaadyadda
Marka uu kafiilku u ogeysiyo Socdaalka New Zealand in la dhammaystiray qorshaha hoyga gurigana la diyaariyey, Socdaalka New Zealand ayaa sameeyneyso boos celinta safarka.



Lix adeeg bixiyaal oo ah ururo bulsho ayaa la shaqeeya Socdaalka New Zealand si ay uga caawiyaan dadka heysta dal ku galka Qeybta Taageerada Qaxootiga (RFSC) inay u degaan si raaxo ah noloshooda cusub ee Aoteroa New Zealand.

Adeegaan waa bilaash waana ikhtiyaari.

ADEEG BIXIYAHA AYAA CAAWIN KARAA KAFIILKA:

- › Qorshaha hoyga oo dhammaystiran si loo hubiyo qoyska inuu heysto meel loogu yeero guri, dadka heysta dalka galyada RFSC ma joogi doonaan Xarunta Dib u dejinta Qaxootiga ee Āhuru Mōwai o Aotearoa.
- › Diyaarinta in laga caawiyo qoyskooda inay dagaan, tusaale ahaan sameeynta miisaaniyadda
- › Fahamka waxaa ay u baahan yihiin inay sameeyaan marka uu qoyskoodu yimaado, sida ka soo qaadista garoonka diyaarada
- › Ku xirida adeegyada qoyskoodu u baahan doono nolol maalmeedka.

ADEEG BIXIYAHA AYAA SIIN KARAA QOFKA HEYSTA DAL KU GALKA RFSC:

- › Labo booqasho ama xaadirin, mida kowaad labada toddobaad ee ugu horeysa ee New Zealand, tan labaad qiyas ahaan 2 bilood kadib si loo arko haddii ay u baahan yihiin talo dheeraad ah.
- › Talobixinta ku aadan bilaabida noloshooda cusub ee New Zealand, sida fursada koontada bangiga, helida lambarka IRD, ama iska diiwaangelinta dugsigaa.
- › Xiriirada adeegyada bulshada iyo dowladda ee waxtarka leh
- › Helida barnaamijka dhaqanka bulshada deegaanka si looga caawiyo inay degaan gobolkooda.

ADEEG BIXIYAASHA TAAGEERADA DIB U DEJINTA QAXOOTIGA



Adeeg bixiyaha



Goobta



Websaydka



Iimaylka

Kāhui Tū Kaha

Auckland

kahuitukaha.co.nz

refugeeservice@kahuitukaha.co.nz

Multicultural Services Trust

Hamilton

hmstrust.org.nz

NKSSinfo@hmstrust.org.nz

Purapura Whetu Trust

Christchurch

pw.maori.nz

powhiri@pw.maori.nz

Safer Mid Canterbury

Ashburton

safermidcanterbury.org.nz

refugee.service@safer.org.nz

Presbyterian Support South Canterbury

Timaru

pssc.org.nz

RefugeeSettlement@pssc.co.nz

New Zealand Red Cross

Palmerston North, Levin, Masterton,
Wellington, Nelson, Blenheim,
Dunedin, iyo Invercargill

redcross.org.nz

RFCSupport@redcross.org.nz
*Fadlan u sheeg iyaga goobta gaarka ah ee
deegaankaaga– tusaale ahaan, Masterton.*